

Badbaadada baabuurta ee waalidka cusub



Badbaadada ay carruurta baabuurta ku helaan waxaa ka masuul ah dadka waaweyn.



Baabuur nabad ah

Macluumaad guud oo ku saabsan carruurta iyo baabuurta.

Badbaadada ay carruurta ku helaan baabuurta dhexdooda waxaa ka masuul ah dadka waaweyn. Waxay taasi ka dhigan tahay ka sokow masuuliyadda dabiici ah ee waalidka saaran, in qorsheeyaasha gaadiidka, shirkadaha baabuurta soo saara, macallimiinta iyo dhab ahaan darawallada kale ay u baahan yihiin in ay tixgeliyaan kartida iyo nuglaanta carruurta, oo ay si ku toosan wax u qorsheeyaan.

Looma baahna in afka laga sheego in carruurta ay u baahan yihiin in si joogto ah loogu ilaaliyo baabuurta dhexdooda. Laakiin waxaa adkaan karta in la garto marka ay carruurta yeeshaan garaad ku filan si ay iskood iskaga xil saaraan ama masuul iskaga noqdaan baabuurta dhexdooda. Inta badan waxay taasi ku xiran tahay sida ay baabuurta ugu badan yihiin hareeraha guriga, dugsiga hore iyo garoonka ciyaarta carruurta. Marka si sahlan loo dhigo, waa in ay suurogal carruurta u noqoto in ay dhulka xaafaddooda ku nabad qabaan kuna amni qabaan, xataa marka ay aad u da' yar yihiin ee aanan keligood laga tegi karin. Marka carruurta yar yar ay dhex warwareegayaan dhul baabuur marayso, waa in uu qof weyni marwalba iyaga la socdo. Carruurta waxay u baahan yihiin in ay tartiib tartiib u bartaan in ay iskood isku xil saaraan oo – marka dadka waaweyni caawiyaan – in ay khibrad ama waayo aragnimo ka helaan habka loogu garaad yeesho baabuurta dhexdooda. Haddii dhulka xaafaddu nabad yahay, waxaa ka fududaanaysa in tartiib tartiib carruurta loogu oggolaado in ay is xil saaraan ama ay masuul iska noqdaan inta ay korayaan. Haddii ay carruurta suurogal u tahay in ay iskood dugsiga u lugeeyaan iyo haddii kale waxay inta badan ku xiran tahay sida ay baabuurta gaar ahaan ugu badan yihiin dhulka ay marayaan.

Waxaa la dhihi karaa in aanay suurogal ahayn in la tilmaamo da'da ay carruurta intooda ugu badan ku awoodaan in ay keligood baabuurta dhex maraan, gaar ahaan maadaama uu dhulka baabuurta leh aad u kala duwanaan karo, laakiin weliba maadaama ay carruurta kala duwan yihiin. Guud ahaanba waxaa xeer laga dhigan karaa in carruurta ay dugsiga u lugayn karaan marka ay joogaan 9 ilaa 10 jir xaafadaha ay baabuurta meeldhexaad ugu badan tahay, oo ay baaskiil ku dhex mari karaan baabuurta marka ay joogaan 11 ilaa 12 jir – laakiin runtii waxaa jira dhulal baabuur leh oo aanay habboonayn in ay carruurta marnaba keligood ku maraan, iyo xaafado ay carruurta yar yar weliba baaskiil dugsiga ku tagi karaan haddii ay jiraan dariiqyo baaskiillada loogu talagalay oo nabad ah, amni leh oo aanan kala go'nayn.

Halkan, ururka NTF waxuu isugu soo ururiyey macluumaad muhiim ah oo ku saabsan carruurta yar yar iyo baabuurta. Taasoo ah, ka hor inta aanay baabuurta keligood dhex marin. Macluumaadku waxay diiradda saarayaan badbaadada carruurta marka ay gawaarida iyo baaskiillada saaran yihiin, laakiin waxaa weliba ku jira qaybo ku saabsan badbaadada basaska dushooda iyo marka la lugaynayo.

Badbaadada carruurta ee gawaarida dhexdooda.

Gaariga iyo nidaamyada badbaadada gaariga – suumanka kuraasta, bacaha hawadu ku jirto iyo kuraasta – waxaa loogu talagalay oo lagu qiyaasay jirarka dadka waaweyn. Carruurta dadka waaweyn way ka daciifsan yihiin wayna ka dhumuc yar yihiin. Qiyaasaha qaybaha jirkooda ayaa weliba ka duwan kuwa dadka waaweyn. Waxay taasi ka dhigan tahay in ay carruurta ka nugayl badan yihiin marka shil baabuur yimaaddo, waxayna u baahan yihiin in si gaar ah loo dhawro oo la isticmaalo kuraasta dhallaanka, kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ama kuraasta kor loogu qaado/barkimooyinka kor loogu qaado, taasoo da'dooda ku xiran.

Marka sharciga waddanka Iswiidhan la raaco, dadka gaariga saaran waa in ay dhammaantood xirtaan suunka kursiga, ha ku jiraan xagga hore iyo xagga dambeba. Carruurta ka gaaban 135 cm waa in iyaga weliba loo isticmaalo kursi badbaado gaar ah: kursi dhallaan, kursi badbaado oo carruurta lagu xajiyo ama kursi kor loogu qaado/barkimo kor loogu qaado. **Kursiga badbaadadu waa in uu ahaado mid loo hayo shahaadada waafaqsanaanta ama noociisa la ansixiyey, ilmaha ku habboon, oo sidii loogu talagalay loo rakibo loona isticmaalo.**

Gadaal u jeeda ayaa ugu nabad badan

Waa in carruurta gaariga saaran ay gadaal u jeedaan inta ugu badan ee suurogal ah. Waxay sidaas u tahay maadaama uu madaxa ilmuhu aad u ballaaran yahay una culus yahay marka lagu eego xoogagga ay qoorta iyo muruqyada ilmuhu qaadi karaan. Marka aad fadhiga hore ugu jeedo oo baabuurka dhakhso loo qaboojiyo ama uu shil galo, dhammaan waxyaabaha aanan si adag gaariga ugu xirnayn ayaa hore u sii socda ilaa ay kuwaasi ku dhacaan wax joojiya. Jirka waxaa xajiya suunka kursiga, laakiin madaxu hore ayuu u dhacaa dhakhso ayuuna dib ugu noqdaa. Qoorta ilmuhu ma qaadi karto dhaqaaqaas xoogga leh. Waxaa laga yaabaa in uu ilmuhu qoorta ka jabo, halka annaga dadka waaweyn uu nagu dhici

karo dhaawaca noqnoqoshada madaxu.

Taas ayay u habboon tahay in carruurta ay gadaal u jeedaan inta ugu badan ee suurogal ah, ilaa ay gaarayaan 4 ilaa 5 jir. Waqtigaas oo keliya ayay muruqyadu xoog ku filan yeeshaan, carruurta intooda ugu badanna gaaraan dherer ama culays aanan ku habboonayn kursiga gadaal u jeeda.

Ansixinta

Si waddanka Iswiidhan looga isticmaalo kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo, waa in uu ahaado mid la ansixiyey, marka la raaco ECE R44 ama marka la raaco i-Size (UN R129).

ECE R44 waxaa lagu ansixiyaa kuraasta ilaa culays gaar ah ku habboon, halka i-Size lagu ansixiyo kuraasta ku salaysan dhererka iyo




da'da ku dhawaaad ah ee ilmaha. i-Size waxaa lagu dejiyaa shuruudo ka adag oo loo dhigo isku toosnaanta kursiga iyo gaariga, waxaana si ka fiican loogu tijaabiyaa duqaynta, iyadoo weliba loo baahan yahay in lagu tijaabiyo jugta geeska ka gaarta.

Looma baahna in la beddelo kursi badbaado oo carruurta lagu xajiyo oo aanan xumayn oo lagu ansixiyey xeerka ECE R44 marka la arko uun in ansixin cusub la soo saaray. ECE R44 iyo i-Size waxaa dhowr sano la sii wadi doonaa hawlgalkooda iyagoo isbarbar socda.

Waddanka Iswiidhan gudhiisa, kuraasta badbaadada ee carruurta lagu xajiyo waxaa weliba laga bixin karaa ansixinta Plus. Kani waa baaritaan ama tijaabin dheeraad ah oo iskaa ah oo waddanka Iswiidhan laga qabto taasoo loogu ballanqaado in qoorta ilmaha aanay ku dhici doonin xoogag nafta halis gelinaya marka dhanka hore gaariga laga duqeeyo. Marka la raaco sharciga ECE R44, ansixinta Plus waxaa laga bixiyaa qaybaha culayska ee 18 kg (kuraasta ISO-fix) ama 25 kg (kuraasta suunka saaran), laakiin kuraasta i-Size ayaa iyaguna u baahan ansixinta Plus ee dheeraad ah si loo xaqiijiyo xoogagga qoorta ilmaha kaga dhici doona marka shil yimaaddo.

Kursiga dhallaanka

Marka uu dhasho iyo ilaa uu gaarayo qiyaas ahaan 6 ilaa 9 bilood, waxuu ilmuhu ku safraa kursi dhallaan. Kursiga waxaa la saaraa kursiga hore ama dambe isagoo gadaal u jeeda,



waxaana lagu rakibaa suunka kursiga saddex meelood ku xiran ee gaariga, ama sal si adag ugu xiran suunka kursiga ee gaariga ama nidaamka isku xiridda ee ISOFIX. Salku waxuu fududeeyaa in kursiga dhallaanka gaariga laga saaro dibna loo geliyo. Haddii bacda hawadu ku jirto uu demiyey garaash u rukhsaysan ama loo isticmaalay nidaamka deminta bacda hawadu ku jirto ee fure ku shaqeeya, kursiga rakaabka hore ayaa ah meel fiican oo la dhigi karo kursiga dhallaanka, maxaa yeelay si fiican ayaad ilmaha u arki kartaa haddii aad gaariga keligaa waddo. Waxaa ilmaha lagu xajiyaa xanjeerka lagu rakibo kursiga dhallaanka.

Marka ilmuhu keligiis fariisan karo isagoon wax tiiriya u baahnayn, ama marka uu ka weynaado kursiga dhallaanka, waa waqtiga habboon in lagu wareejiyo kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ee gadaal u jeeda.

Waxuu ilmuhu kursiga dhallaanka ka weynaaday marka madaxa ilmuhu dhafo qarka kursiga, ama marka uu dhaafad xadka culayska uga yaalla.

Kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo

Marka ilmuhu si toosan u fariisan karo isagoon wax tiiriya u baahnayn, waa waqtiga habboon in lagu wareejiyo kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ee gadaal u jeeda.

Waxaa lagu rakibaa kursiga rakaabka hore ama kursi dambe, isagoo gadaal u jeeda, iyadoo la isticmaalo xarko lagu qabto iyo suunka kursiga, ama nidaamka isku xiridda ee ISOFIX. Waxaa ilmaha lagu xajiyaa xanjeerka ku rakiban kursiga badbaadada.

Waa in carruurta gadaal u jeedaan inta ugu badan ee suurogal ah marka ay safarka ku jiraan, ilaa ay gaarayaan 4 ilaa 5 jir.

Haddii bacda hawadu ku jirto uu demiyey garaash u rukhsaysan ama loo isticmaalay nidaamka deminta bacda hawadu ku jirto ee fure ku shaqeeya, kursiga rakaabka hore ayaa ah meel fiican oo la dhigi karo kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo, maxaa yeelay si fiican ayaad ilmaha u arki kartaa haddii aad gaariga keligaa waddo, weliba bannaan dheeraad ah ayuu ilmuhu lughiisa u helayaa.

Waxaa laga yaabaa in carruurta qaarkood ay dareemaan in uu ku yar yahay bannaanka ay lugaha u haystaan, gaar ahaan kursiga marka dambe, oo ay lugahooda kor u taagaan marka

ay fadhiyaan “habka hindida,” ama lugaha saartaan kursiga gaariga – taasi halis uma leh.

Hase yeeshee, waxuu ilmuhu kursiga ka weynaaday marka madaxa ilmuhu saddex meelood hal meel ka tallaabo qarka sare, kaasoo qiyaas ahaan ku siman indhaha ilmaha, ama marka la dhaafad xadka culayska ee kursiga u yaalla.

Kursiga kor loogu qaado/barkimada kor loogu qaado

Waxuu ilmuhu safraa isagoo hore u jeeda marka uu ku fadhiyo kursi kor loogu qaado ama barkimo kor loogu qaado. Hase yeeshee kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ee hore u jeeda waa in la isticmaalo oo keliya marka ilmuhu uusan awoodi karin in uu safro isagoo gadaal u jeeda, lagamana horraysiin karo da'da 4 ilaa 5 jir. Looma baahna in kursiga badbaadada la dul saaro, laakiin mararka qaar waxaa suurogal ah in lagu xiro nidaamka isku xiridda ee ISOFIX ee gaariga.

Takhaatiirta iyo cilmibaareyaashu waxay ku taliyeen in carruurta loo isticmaalo kuraasta kor loogu qaado/barkimooyinka kor loogu qaado

ilaa ay gaarayaan 10 ilaa 12 jir. Ka hor inta uusan baaluqin jirka ilmuhu ma gaaro heer uu suunka halkiisa ugu xajin karo isagoon u baahnayn in barkimo lagu caawiyo.

Kursiga kor loogu qaado ama barkimada kor loogu qaado waxay caawiyaan in suunka kursiga saddex meelood ku xiran lagu hagaajiyo jirka ilmaha. Inta aanay lafaha ilmuhu si buuxda u korin, waa in ilmaha sare loo qaado si suunka kursigu uu jirka u dhawri karo. Hubi in aad suunka meel sax ah kaga qabto – meel qoorta u dhow, lafta shafka ka gudbo bowdahana u dhaadhaco kana gudbo (waa in uusan caloosha ka gudbin). Hadba sida ugu dhow ee suunka jirka loogu xiro, ayuu u kordhiyaa dhawrista ama badbaadada.

Noocyada gawaarida ee cusub marka qaar farabadan la eego, waxaa suurogal ah in aad hesho barkimooyin kor loogu qaado oo ka mid ah oo gaariga ku rakiban marka aad warshadda ka dalbato. Barkimooyinkaasi waxay si aad u adag u dhawraan ilmaha.

Kuraasta badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ee la kala rogo, oo loo yaqaanno kuraasta



isku jirta, waa kuwo badi si xad dhaaf ah u toosan oo aanan markaa ku habboonayn carruurta yar yar, welibana si fiican loogama dhigan karo kuraas kor loogu qaado. Waxay weliba kordhiyaan halista ka jirta in waalidku ay waqti hore ku dhaqaaqaan in ay ilmaha hore u jeediyaan. Haddii kursi la kala rogo hore loo jeediyo, waa in xanjeerrada ku jira laga saaro, waana in ilmaha lagu xiro suunka kursiga ee gaariga.

Bacda hawadu ku jirto

Bacda hawadu ku jirto ee rakaabka hore waxaa marka hore loogu talagalay dadka waaweyn. Marka kursiga rakaabka hore loo isticmaalayo carruur 140 cm ka gaaban, waa in haddaba la demiyor bacda hawadu ku jirto, haddii shirkadda baabuurka soo saartay aanay talooyin kale bixinin.

Bacda hawadu ku jirto waa in marwalba laga demiyor carruurta gadaal u jeeda marka ay fadhiyaan.

Bacaha hawadu ku jirto ee geesaha ku xiran khatar uma leh carruurta ku fadhiya kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ee gadaal u jeeda ama hore u jeeda.

Haddii bacda hawadu ku jirto uu demiyey garaash u rukhsaysan ama loo isticmaalay nidaamka deminta bacda hawadu ku jirto ee

fure ku shaqeeya, kursiga rakaabka hore ayaa ah meel ku fiican carruurta da' kastoo ay yihiin.

Rakibidda

Marwalba kursiga ku rakib hab waafaqsan buugga tilmaanbixinta kursiga. Waxaa kursiga lagu tijaabiyey oo lagu ansixiyey rakibidda sax ah, taasoo ka dhigan in aanan annagu garanayn xoogagga ilmaha ku dhici doona ama waxa kursiga ku dhici doona haddii si qalad ah loo rakibo.

Nidaamka isku xiridda ee ISOFIX ayaa rakibidda fududeeya, oo yareeya halista rakibidda aanan hagaagsanayn. Kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ee leh xarkaha lagu qabto marka si hagaagsan loo rakibo waxuu u nabad yahay sida kursiga lagu rakibo nidaamka isku xiridda ee ISOFIX.


Carruurta naafooyin qabta

Carruurta yar yar ee naafooyin qabta ee aanan isticmaali karin kursiga dhallaanka ee caadi ah, waxaa jira kuraas la isticmaali karo marka hoos loo jiifo. Hase yeeshee, kuwaas lagama helo isla heerka dhawrista laga helo kursiga dhallaanka ee gadaal u jeeda.

Waxaa jira kuraas badbaado gaar ah, oo si gooni ah loo asteeyo oo loogu talagalay carruurta waaweyn, kuwaasoo gadaal u jeeda horena u jeeda.

Haddii aad soo iibsato qalab hore loo isticmaalay

- *Fiiri inta uu soo jiray* kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo. Waxaa lagu talinayaa in kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo la isticmaalo waqti 10 sano ah, iyo 5 ilaa 7 sano kursiga dhallaanka.
- *Soo hel buugga lagu isticmaalo*, waxaa kuwaas caadi ahaan laga heli karaa Internetka.
- *Qalabka si fiican u baar.*
- *Kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo ka iibso uun qof aad garanayso oo aad aaminayso.* Haddii aadan hubin, waxaa kaaga fiican in aad mid cusub soo iibsato. Waa in la iska tuuro qalabka badbaadada ee duqayn ama shil lagu galay.
- *Fiiri ansixinta kursiga laga bixiyey.*



Carruurta baska saaran.

Marka sharciga waddanka Iswiidhan la raaco, dhammaan dadka saddex jir ah ama ka weyn waxaa waajib ku ah in ay ku fariistaan kursi leh suun kursi, waana in ay suunkaas kursiga isticmaalaan.

Gadaal u jeeda ayaa ugu nabad badan

Isla sida gaariga dhexdiisa, waxaa carruurta ugu nabad badan in ay gadaal u jeedaan inta ay safarka ku jiraan. Wixii carruurta ugu yar yar khuseeya, waxaa ugu fiican in loo soo qaado kursiga dhallaanka oo kursi baska ku yaalla lagu rakibo isagoo gadaal u jeeda. Waxay taasi mararka qaar adkaan kartaa haddii suunka uusan dherer ku filan ahayn.

Waxaa uga adag carruurta 1 ilaa 4 jir ah.

Mararka qaar waxaa suurogal ah in baska lagu rakibo kursiga badbaadada ee carruurta lagu xajiyo, laakiin marwalba sidaas ma noqoto.

Waxay taasi ka dhigan tahay in carruurta afar jir ka yar ay badi ku adag tahay in ay si nabad ah baska ugu safaaran.

Wixii khuseeya carruurta ka weyn 4 ilaa 5 jir, waxaa si fiican ugu hagaagsan in loo soo qaado barkimo kor loogu qaado. Waxaa jira noocyo la

ansixiyey oo la heli karo kuwaasoo leh sifooyin fududeeya in iyaga safarka loo qaato, sida iyagoo ka mid ah boorsada dhabarka, ama iyagoo la buufin karo.

Basaska qaarkood ayaa laga yaabaa in ay leeyihiin xoogaa kursi oo gadaal u jeeda.

Marwalba kuwaas midkood dooro haddii ay carruuri safarka kugu wehelinayaan, si ay iyaga ugu suurtoogasho in ay gadaal u jeedaan inta ay safarka ku jiraan.

Waxaa weliba waddanka Iswiidhan ka jira xoogaa shirkadood oo ku shaqaysta basaska waaweyn ee lagu safro oo carruurta u rakibay kuraas gaar ah oo gadaal u jeeda. Mid weydiiso marka aad safarkaaga boos ceshanayso! Haddii macaamiil farabadan ay codsadaan in safarka baska nabad looga dhigo carruurta yar yar, waxay taasi suurogal ka sii dhigi doontaa in shirkadaha basasku ay mudnaan siiyaan badbaadada carruurta.



Länstrafiken/Göteborg Örebro Degmo. Sawirka: Alexander von Sydow.

Carruurta baaskiillada saaran.

Kursiga baaskiilka ee carruurta

Waxaa khatar badnaan karta haddii ilmaha baaskiilka lagu qaado iyadoon loo haynin kursiga baaskiilka ee carruurta. Nooca shilka ugu badnaan yimaadda waxa weeyaan marka cagta ilmuhu ay gasho biraha shaagagga baaskiilka. Waxaa la dhihi karaa in aanay taasi suurogal ku ahayn kuraasta baaskiillada ee carruurta ee casri ah, maxaa yeelay waxaa badanaa iyaga loogu talagalay in ay cagaha ilmaha u diidaan in ay shaagagga gaaraan.

Waxaad bilaabi kartaa in aad kuraasta baaskiillada ee carruurta isticmaasho waqtiga uu ilmuhu si toosan u fariisan karo, qiyaas ahaan marka uu sagaal bilood jiro. Kursiga baaskiilka ee carruurta waa in ay ku taallo calaamadda EN14344 - taasoo caddaynaysa in kursigu uu waafaqsan yahay shuruudaha tayada iyo badbaadada ee Yurub.

Kuraasta baaskiillada ee carruurta waxaa lagu heli karaa labo darajo oo culayska ku xiran: ugu badnaan 15 ama 22 kg. Waxaa ka fiican kuraasta ku cabbiran 22 kg, haddii ay suurogal tahay in xanjeerka iyo meesha cagaha la dhigto la haggaa-

jin karo si ay carruurta yar yarna u leekaadaan.

Kursiga baaskiilka ee carruurta waxuu u kala baxaa labo nooc: kuraasta lagu xiro birta kursigu ku taagan yahay, iyo kuwa lagu xiro birta shabaq ah ee gadaal ku taalla. Kuwan hore badi kuwa kale way ka culus yihiin, inta ugu badan way ka xasilooni badan yihiin, waxaana weliba badi ka fudud in iyaga loo kala wareejiyo baaskiillo kaladuwan, maxaa yeelay waxaad dhowr baaskiil saari kartaa tiir lagu qabto.

Haddii baaskiilku leeyahay kuraas ku habboon iyo dahaaryada biraha shaagagga, waxaa sharciga waafaqsan in aad ilme 10 jir ka yar qaaddo haddii aad 15 jir gaartay, iyo in aad labo carruur ah oo 6 jir ka yar qaaddo haddii aad 18 jir gaartay.

Rimoorka baaskiilka

Rimoorka baaskiilku waa wax fiican oo lagu beddelan karo kursiga baaskiilka ee ilmaha.

Marka aad rimoorka baaskiilka dooranayso, waa in aad tixgeliso sifooyinka xasillooniidaa – waa in uusan rimoorku rogmanin marka koonaha laga leexanayo, waana in uusan ka furmin qalabka baaskiilka ku xiraya. Waxay halista rogmashadu

ugu yar tahay haddii rimoorka lagu xiro birta dambe ee shaagagga baaskiilku ku wareegaan, haddii ay sal ballaaran ku fadhiyaan shaagagga baaskiilku, ama haddii shaagaggu janjeeraan. Rimoorku waa in uu yeesho bir ka hortagta rogmashada qofka si ilmaha loogu dhawro haddii rimoorku rogmado. Weliba, fiiri culayska ugu badan ee rimoorka loo qiimeeyey in uu qaadi karo.

Qaybta carruurta loogu talagalay waa in ay yeelato suuman badbaadada loogu ilaaliyo, kuwaasoo la doorbidayo in ay yeeshaan xarko gumaarka lagaga qabto.

Sida sharcigu dhigayo, “...baaskiilka gaadiid kale ku xiran yahay waa in uu yeesho labo qalab oo bareeg ah oo gooni u kala ah”. Waxaa waajib ah in karti fiican bareeg qabashada loo yeesho.

Koofiyadda adag ee baaskiilka

Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada 15 jir ka yar waxaa sharci ahaan waajib ku ah in ay koofiyad adag xirtaan marka ay baaskiil wadaan ama baaskiil lagu sido. Ururka NTF waxuu weliba ku talinayaa in koofiyad adag loo xirto rimoorka baaskiilka.

Hubi in koofiyadda adag ay leedahay calaamadda CE. Waa in calaamaddu ay noqoto CE EN 1078 (wixii khuseeya carruurta 7 jir ka weyn iyo dadka waaweyn) ama EN 1080 (koofiyadda adag ee carruurta yar yar loogu talagalay ee leh birta suunka laga xiro ee cagaaran); waxaad sidaas ku ogaanaysaa in koofiyadda adag ay tahay mid baaskiilka lagu raaco.

Hubi in koofiyadda adag ay madaxa ilmaha si fiican oo raaxo leh u leeg tahay, oo aanay ka dhici karin ama dib loo riixi karin. Marka aad koofiyad adag ilmahaaga u soo iibinayso, ha soo iibinin koofiyad adag oo ka weyn si ay ilmahaaga u leekaato marka uu koro.

Koofiyadda adag waa in ay daboosho foodda wajiga, madaxa gadaashiisa iyo korkiisa. Xusuusnow in jugaha madaxa uga yimaadda shilalka baaskiiladu ay boqolkiiba 70 gaaraan foodda wajiga iyo/ ama dhaforka.

Koofiyadda adag beddel haddii ay waxyeello gaartay, ama haddii ay jug xoog leh gaartay.

Koofiyadda adag ee baaskiilka ee leh birta suunka laga xiro ee cagaaran

Wixii khuseeya carruurta ilaa toddobo jir ah, waxaan ku talinaynaa in loo isticmaalo koofiyad adag oo carruurta yar yar loogu talagalay oo leh birta suunka laga xiro ee cagaaran. Waxay taasi

dadka u dhawrtaa isla sida koofiyadda adag ee baaskiilka ee caadi ah, laakiin birta suunka laga xiro ee cagaaran waxay leedahay sifo dheeraad ah oo keenta in ay furanto marka xammuul gaar ah uu saarmo. Birta suunka laga xiro way furmi doontaa haddii ilmuhu ku xayirmo biraha la fuul fuulo ama wax la mid ah, si looga hortagi karo shilalka margashada.

Baaskiilka dheellitirka

Baaskiilka dheellitirku waa baaskiil yar oo aanan lahayn biraha baaskiilka lagu wado, waxayna carruurta isticmaalaan ka hor inta aanay baaskiilka dhab ah wadi karin. Baaskiilka dheellitirka marka uu saaran yahay, waxuu ilmuhu isticmaala caghihiisa si uu xawaaraha u kordhiyo bareeggana u qabto. Waxaa waayo aragnimo lagu ogaaday in carruur farabadan ay dhakhso isugu dheellitiri karaan, taasoo iyaga u fududaysa in ay u wareegaan baaskiilka caadi ah. Ururka NTF waxuu ku talinayaa in baaskiilka dheellitirka la isticmaalo ka hor inta aanan loo wareegin midka labo shaag leh ee biraha lagu riixo, oo gebi ahaan la iska dhafo marxaladda shaagagga dheeraad ah ee baaskiilka lagu xasiliyo.

Xusuusnow in baaskiilka dheellitirku uu xawaare sare yeelan karo xataa marka la marayo dariiq xoogaa hoos u janjeera, oo ay adkaan karto in



bareegga loo qabto. Waxaa dhibaatooyin keeni kara quruuruxa kala daadsan iyo godadka dhulku leeyahay. Koofiyad adag xiro oo marwalba ku ciyaar dhulalka aanay gawaaridu marin iyadoo ay dad waaweyni ku ilaalinayaan.

Baaskiilka labo shaag leh

Markuu 5 ilaa 6 jir gaaro, waxuu ilmuhu garaad ku filan u yeeshaa baaskiilka labo shaag leh. Ha soo iibinin baaskiil labo shaag leh oo ay ku xiran yihiin shaagagga dheeraad ah ee lagu xasiliyo. Waxaa ka fiican in la sugo ilaa inta ilmuhu helayo dheellitirka loo baahan yahay. Shaagagga dheeraad ah ee baaskiilka lagu xasiliyo waxay ilmaha u fududeeyaan in uu xawaare sare gaaro. Haddii shil yimaaddo, waxay taasi keeni kartaa dhaawacyo daran. Taas ka sokow, shaagagga dheeraad ah ee baaskiilka lagu xasiliyo waxay weliba ilmaha ku khasbaan in uu isku janjeeriyo dhinaca xun marka uu meel ka leexanayo, taasoo dhibaatooyin keeni karta marka kuwaas laga qaado.

Marka aad gaarto waqtiga aad u soo iibinayso baaskiilka dhab ah ee ugu horreeya, waa in uu ilmuhu ku raaco si aad ugu heli karto mid si fiican u leeg.

Carruurta yar yar waa in ay labada cagood dhulka taabsiin karaan marka ay kursiga

baaskiilka ku fadhiyaan. Wixii khuseeya carruurta da'da dugsiiga joogta ee baratay sida baaskiilka loo wado, waxaa ku filnaan karta in ay hal cag dhulka taabsiin karaan.

Baaskiilka ugu horreeya ee ilmaha la siiyo waa in uu yeesho bareeg lagu qabto marka dib loo riixo biraha baaskiilka lagu wado. Weli looma baahna geerar ama bareegyada gacanta lagu qabto. Waxaa carruurta hore ugu taalla hawl ku filan iya-goo isku dayaya in ay is dheellitiraan, shukaanka hayaan ayna bareegga qabtaan.

Sida sharcigu dhigayo, baaskiilku waa in uu yeesho jalas ama gambaleel. Waa in uu weliba iftiinno ku yeesho dhanka hore iyo dhanka dambe, iyo weliba soo celiyayaasha iftiinka oo kaga yaalla dhanka hore iyo dhanka dambe, iyo geesaha shaagagga, haddii baaskiilka la isticmaalayo marka dhulku madoobaado. Waxaa weliba fikrad fiican ah in la isticmaalo quful iyo silsilad lagu ilaaliyo oo calaamad leh (si aanan loo xadin).

Marka aad soo iibinayso baaskiilka ugu horreeya ee leh bareegga gacanta lagu qabto, waxaa muhiim ah in birta bareegga laga qabto ee ku taalla shukaanka baaskiilku ay gacanta ilmaha leekaato.



Carruurta lugaynaysa.

Badbaadada ay carruurta ku helaan baabuurta dhexdooda waxaa ka masuul ah dadka waaweyn. Dadka waaweyn ayay shaqo u tahay in ay hubiyaan in dhulka ay carruurta marayaan uu leeyahay nabadda ugu suurogal badan.

Annagu carruurta kama filan karno in ay sida dadka waaweyn u dhaqmaan marka ay baabuurta dhex marayaan. Carruurta marwalba ma yeeshaan habdhaqan joogto ah oo aanan is beddelin. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in ilmuhu uu maalin gaar ah habdhaqan nabad ah muujiyo marka uu baabuurta dhex marayo, laakiin maalinta ku xigta si kale ayuu gebi ahaan u dhaqmi karaa. Carruurta yar yar waxay badi si fudud u raacaan dareennadooda, sida farxadda, carada ama danta badan ee ay si kadis ah wax uga yeeshaan. Waxay si fudud ugu dhaqaaqaan meelaha safudaydkoodu u qaado, waxaana dhici karta in ay waddada si toos ah ugu cararaan. Marar farabadan waxa ay maskaxda ku sawirtaan ayaa xukunka kala wareega – marka si sahlan loo dhigo, carruurta waa carruur, xataa marka ay baxaan ee ay baabuurta dhex maraan.

Dhulalka aanay gawaaridu marin

Waa in carruurta yar yar keligood lagu dhafo uun marka ay joogaan dhulalka aanay gawaaridu marin. Mar kastoo gawaari ama baabuur kaloo matoor leh ay hareerahooda joogaan ama marayaan, waxaa ugu fiican in ilmaha gacanta la qabto.

Soo celiyayaasha iftiinka


Dhammaan shilalka ay dadka lugaynaya baabuurta dhexdooda ku galaan boqolkiiba 40 waxay yimaaddaan marka dhulku madoobaado. Xirashada soo celiyayaasha iftiinka ayaa dadka u fududaysa in ay adiga ku arkaan, taasoo yaraysa halista shilka.

Soo celiyayaasha iftiinka looguma talagalin uun

dariiqyada baadiyaha ee madow. Waxaa ka sii ahmiyad badan in soo celiyayaasha iftiinka la xirto marka la dhex marayo baabuurta magaalada, inkastoo ay jiraan calaamadaha iftiinka leh iyo iftiinada dariiqyada ku yaalla. Shilalka dadka lugaynaya ay galaan intooda ugu badan waxay ka dhacaan xaafadaha magaalada ee iftiin dariiqyada ku leh. Sababaha taas keena waxaa midkood loo maleeyaa in dadka lugaynaya qaar farabadan ay u qaataan in la arki karo, marka aanan runtii laga arki karin baabuurka gudihisa.

Soo celiyaha iftiinka ee fiican waxaa laga arki karaa meelaha madow, ama marka aanan dibadda si fiican wax loogu arki karin, marka uu ku dhaco iftiinka nalka hore ee baabuurku. Soo celiyayaasha iftiinku waxay soo celiyaan iftiinka xoog leh ee iyaga ku dhaca. Soo celiyaha iftiinka ku xiro meel hoose oo ay kaga dhici karaan iftiinada nalalka hore ee baabuurta. Waxaa muhiim ah in soo celiyayaasha iftiinka lagu xiro gaariga yar ee carruurta lagu riixo si kaas loo arko marka aad marayso meesha loogu talagalay in waddada lagaga tallaabo. Waxaa fikrad fiican ah in carruurta yar yar ay xirtaan jaakad iftiinka soo celiya. Kuwaasi dhib uma keenaan marka ilmuhu ciyaarayo, waxaana lagu heli karaa qiyaasaha carruurta.

Haddii aad dhar madow xiran tahay, darawalka iftiinka yar isticmaalaya waxuu kaa arki doonaa masaafu u dhexeysa 20 ilaa 30 mitir. Laakiin haddii aad xiran tahay dhar midab khafiif ah leh waxuu kaa arki doonaa masaafu 60 mitir ah. Haddiina aad xiran tahay soo celiyayaasha iftiinka, waxuu gaariga kaa arki doonaa wixii ka bilaabma 125 mitir.



La soo xiriir **ururradayada**

Blekinge: **ntf.se/blekinge**

Dalarna: **ntf.se/dalarna**

FyrBoDal: **ntf.se/fyrbodal**

Gotland: **ntf.se/gotland**

Gävleborg: **ntf.se/gavleborg**

Halland: **ntf.se/halland**

Jämtland: **ntf.se/jamtland**

Jönköping: **ntf.se/jonkoping**

Kalmar: **ntf.se/kalmar**

Kronoberg: **ntf.se/kronoberg**

Norrbotten: **ntf.se/norrbotten**

Skaraborg: **ntf.se/skaraborg**

Skåne: **ntf.se/skane**

Stockholm: **ntf.se/stockholm**

Sörmland: **ntf.se/sormland**

Uppsala: **ntf.se/upsala**

Värmland: **ntf.se/varmland**

Väst: **ntf.se/vast**

Västerbotten: **ntf.se/vasterbotten**

Västernorrland: **ntf.se/vasternorrland**

Västmanland: **ntf.se/vastmanland**

Örebro: **ntf.se/orebro**

Östergötland: **ntf.se/ostergotland**



Baabuur nabad ah